

Isticmaalka Daawada Acetaminophen Xilliga Uurka

Su'aalo badan ayaad qabi kartaa xilliga uurka si aad u gaarto go'aano muhiim ah. Su'aasha ugu weyn waa in isticmaalka daawada acetaminophen, taasoo loo yaqaan Tylenol ay ammaan tahay.

Daawada Acetaminophen waa ammaan waana xulasho la aamini karo oo lagu daweeyo xanuunka ama qandhada xilliga uurka.

Qandhada waxay kordhisaa halista welwelka xilliga uurka.

- Waqtiga ugu badan ee qandhadu welwelka leedahay waa ka hor iyo inta lagu jiro saddexda bilood ee uurka ugu horreeysa, khaasatan marka ay jirto khatar caafimaad ee ku timaada (dibnaha/falatada dillaacsan, cilladaha wadnaha ee lagu dhasho, iyo ootiisamka uurjiifka soo koraya) iyo dhicin.
- Xilliyada dambe ee uurka, qandhadu waxay kordhisaa halista foosha iyo dhalmada waqtigii oo aan la gaarin.

Isticmaalka acetaminophen xilliga uurka iyo Ootiisamka

Ma jirto sabab keenta ootiisamka. Cilmi baarayaashu waxay u arkaan in waxyaabo is biirsaday ay keenaan sida isku-milanka hidde-sideyaasha, noolaha, iyo arrimaha deegaanka ay saameyn ku yeelan karaan in ilmuhu ku dhaco cudurka ootiisamka.

Natiijooyinka ka soo baxay daraasad la sameeyay 2024 oo ay ku jiraan in ka badan 2.4 milyan oo carruur ah ayaa muujisay in isticmaalka acetaminophen xilliga uurka aysan xiriirin la lahayn in carruurta ku dhaco ootiisamka, feejignaanta iyo firfircooni yaraanta, ama naafanimada garaadka.

Wax badan ka baro [Cargalada Xanuunka Ootiisamka](https://www.health.state.mn.us/diseases/autism/index.html) (www.health.state.mn.us/diseases/autism/index.html).

Ikhtiyaaraada kale ee daaweynta

Waxaa muhiim ah in la ogaado in fursadaha kale ee daaweynta xanuunka, sida Ibuprofen, ay keenaan khatar xilliga uurka, oo ay ku jiraan:

- Dhibaatooyinka wadnaha uurjiifka

- Heerarka dareeraha amniotic oo hooseeya
- Khatarta dhicinta oo korodhay

Bukaanada waa inay had iyo jeer adeeg bixiyayaashu kala hadlaan dawooyinka dhaqtarku qoro iyo kuwa aan farmashiyaha laga qorin xilliga uurka, oo ay ku jiraan acetaminophen.

Khayraad dheeri ah

- **Kulliyada Maraykanka ee Dhakhaatiirta Dhallaanka iyo Dhakhaatiirta Haweenka:** [ACOG Waxay Xaqiijisay Badbaadada iyo Faa'iidooyinka Acetaminophen xilliga Uurka](https://www.acog.org/news/newsreleases/2025/09/acog-affirms-safetybenefits-acetaminophen-pregnancy) (<https://www.acog.org/news/newsreleases/2025/09/acog-affirms-safetybenefits-acetaminophen-pregnancy>)
- **Bulshada Daawada Uurka Hooyada:** [Bayaanka SMFM ee Isticmaalka Acetaminophen Xilliga Uurka iyo Ootiisamka](https://www.smfm.org/news/smfmstatement-on-acetaminophen-use-duringpregnancy-and-autism) (<https://www.smfm.org/news/smfmstatement-on-acetaminophen-use-duringpregnancy-and-autism>)
- **Akademiyada Maraykanka ee Dhaqaatiirta Carruurta:** [Acetaminophen waxay badbaado u tahay carruurta haddii loogaato sida loogu talagalay, wax Xidhiidh ahna Lama Lahan Ootiisamka](#)

(<https://www.aap.org/en/news-room/factchecked/acetaminophen-is-safe-forchildren-when-taken-as-directed-no-link-toautism/>)

Waaxda Caafimaadka ee Minnesota Qaybta
Caafimaadka Carruurta iyo Qoyska iyo Qaybta
Caafimaadka Hooyada iyo Dhallaanka
health.mch@state.mn.us
www.health.state.mn.us

*Si aad xogtan ugu hesho qaab kale, wac:
651-201-3650.*

1/2026